# FAAFINTA RASMIGA AH

# الجريدة الرسمية

*JAMHUURIYADDA DIMOQRAADIGA SOOMAALIYA*

لجمهورية الصومال الديمقراطية

Sannadka 8aad Muqdisho 28 Febraayo 1980 Lr. 4R2

*FAAFINTA BIL SOO BAXA* جريدة شهرية

*Laanta Faafinta Rasmiga ah ee Madaxtooyada J.D.S.*

QIIMAHA : waa 5 shilin lnmbar walba. RUKUNKA : Sanalkii waa Sh. 100 Soomaaliya gudaheeda — dibedana waa Sh. So, 300, Rukunka la weydiisto waqtiga loo gooyey wuxuu ka bilaabmaa 1 Janaayo Qiimaha qorotaanka F. R, halkii sadar iyo wàxii ka yàr wàà 2 laba Sh. — Rukunka iyo qorjtaanku waxaa la weeydiistaa Laanta Maamulkà Fààfintà Rasmiga ah — Lacagta waxaa lagu bixinayaa Xafiiska Canshuurahà ee Wàsààràddà Làcagta.


KOOBNIIN

QAYBTA KOOWAAD

SHARCI


SHARCI L. 6 ee 12 Febraayo 1980, Sharciga golayaasha shacbiga ee Degaanka iyo Maamulka Gobolada iyo Degmooyinka 274


QAYBTA LABAAD

**XEER**


XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 25 ee Febraayo Magacaabid Golaha Dawladda Cusub » 312

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 26 ee 7 Febraayo 1980, Magacaabid Xil Sare » 316

XEER MADAXWEYNAHA JDS, L. 27 ee Febraayo 1980 Magacaabid Xilal Sare » 317

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 28 ee 8 Febraayo 1980, Dib ugu soo celin Ciidanka Booliska. » 318


TALOOYIN ISGAARSIIN OGEYSIIS IYO WIXII LA MID AH


WARSHADDA SAABUUNTA QUBEYSKA IYO MARISKA; Ogeysiis Shir Caadi ah L. 67 » 319

WARSHADDA KIIMIKADA SOOMAALIYEED «BAYL» :Ogeysiis Shir Caadi ah L. 68 » 320



*Wakaaladda Madbacadda Qaranka*

## *QAYBTA KOOWAAD*

Sharci Lamb 6 Taariikh 12 Febraayo 1980, Sharciga Golayaasha Shacbiga ee Degaanka iyo Maamulka Gobollada iyo Degmooyinka.

MADAXWEYNAHA
J. D. S.

ISAGOO CUSKANAYA: Qod 72aad ee Dastuurka;

TIXGELIYEYNA oggolaashaha Golaha Shacbiga ;

WUXUU SOO SAARAYAA

*Sharciga soo socda :*

### XUBINTA KOOWAAD

### NIDAAMKA GUUD

### QODOBKA 1AAD

### (MICNEYN)

Marka Sharcigan laga hadlayo, erayada soo socda waxay leeyihiin micnaha mid waliba ku hor dhigaan :

1) DAWLADDA HOOSE : waxaa loola jeedaa hay'ad ka dhisaan degmo ama magaalo oo shakhsiyad qaanuuni ah leh, ujeeddaduna ay tahay midda ku tilmaaman shircigaan;

2) GOLAHA SHACBIGA EE DEGAANKA : waxaa loola jeedaa Gole Xubnihiisa Dadweynaha Degaanku soo doortay, kana taliya arrimaha Dawladda Hoose;

3) GOLAHA HORUMARINTA : waxaa loola jeedaa Gobol ka dhisan yahay oo uu madax u yahay Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Gobolku;

4) GUDDIGA JOOGTADA AH : waxaa loola jeedaa guddi Xubnihiisu ka mid yihiin Golaha Shacbiga ee Degaanka oo xilkiisu Sharcigan tilmaamayo;

5) GUDDOOMIYAHA GOLAHA DEGAANKA : waxaa loola jeedaa Guddoomiyaha Golaha Shacbiga ee Degaanka iyo Guddiga Joogtada ah, waana qofka ugu sarreeya Maamulka Dawladda Hoose;

6) XOGHAYAHA GUDDIGA XISBIGA : waxaa loola jeedaa Xoghayaha Guddiga xisbiga Gobolka ama Degmada oo uu magacaabay Xoghayaha Guud ee Xisbiga Hantiwadaagga Kacaanka Soomaaliyeed;

7) GUDOON : waxaa loola jeedaa go'aanka uu soo saaro Golaha Shacbiga ee Degaanka ama Guddigiisa Joogtada ah;

8) DEGMO : waxaa loola jeedaa qayb ka mid ah Gobol;

9) GOBOL : waxaa loola jeedaa qayb ka mid ah dhulka J. D. S. kana kooban laba degmo iyo wax ka badan

10) WASAARADDA : waxaa loola jeedaa Wasaaradda Dawladaha Hoose iyo Horumarinta Miyiga;

11) WASIIR : waxaa loola jeedaa Wasiirka Wasaaradda Dawladaha Hoose iyo Horumarinta Miyiga;

12) AMAR GUDOON : waxaa loola jeedaa go'aan uu soo saaro Guddoomiyaha Golaha Shacbiga ee Degaanka isagoo isticmaalaya awoodda ay siinayaan Sharcigan, Xeerarka iyo Guddoonka Golaha Shacbiga ee Degaanka;

13) XEER : waxaa loola jeedaa guddoon sameyskiisa Sharci oggol yahay.

## QODOBKA 2AAD

## (HABKA DHISMAHA DALKA)

1) Marka Sharcigan laga hadlaayo, Dalka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya waxaa loo qaybinayaa Gobollo. Gobol kastana waxaa loo sii qaybinayaa Degmooyin.

2) Gobollada, xududdooda, magaalo madaxdoodaba waxaa lagu muujinayaa Xeer Madaxweyne, iyadoo la tixgelinaayo talo soojeedinta Wasiirka iyo oggolaashaha Golaha Wasiirrada.

3) Degmooyinka, xuduuddooda, magaalo madaxdooda iyo darajooyinka ay kala leeyihiin waxaa hadba lagu muujinayaa Xeer Madaxweyne, iyadoo la tixgelinaayo talo soojeedinta Wasiirka.

4) Gobollada iyo Degmooyinka jira marka Sharcigan dhaqan galo waxaa loo aqoonsanayaa in ay Sharcigaan ku dhisan yihiin.

5) Madaxweynaha JDS, isagoo tixgelinaaya talo soo jeedinta Wasiirka iyo oggolaashaha Golaha Wasiirada, wuxuu wax ka beddeli kar aaqaabka dhismaha Gobolka ama Degmada.

## QODOBKA 3AAD

### Habka maamulka Dawladaha Hoose

1) Maamulka Dawladaha Hoose wuxuu ku dhisan yahay habka DIMOQRAAIYADDA GUDDOONKA DHEXE, sida uu tilmaamayo Qodobka 94aad ee Dastuurka.

2) Awoodda Dawladaha Hoose waa qayb ka mid ah tan Maamulka Dhexe ee Dawladda. Hoose waxay fuliyaan hawlaha Sharcigan u xilsaarayo, siyaasadda Xisbiga iyo Dawladda ee ah in la dhiso Bulsho Hantiwadaag ah oo himiladeedu tahay caddaalad hantiwadaag ah, sinnaan iyo horumar.

## QODOBKA 4AAD

### (Darajooyinka Dawladaha Hoose)

1) Dawladaha Hoose waxay u qaybsamaan darajooyinka A, B iyo T

2) Madaxweynaha JDS, isagoo tixgelinaaya talo soojee-

dinta Wasiirka, wuxuu awood u leeyahay in uu wax ka beddelo heerka darajooyinka ku xusan lambarka 1aad ee Qodobkan, haddii Degmo loo aqoonsado in ay la timid horumar xag dhaqaale ama bulsho.

QODOBKA 5AAD

*(Xubnaha, muddada xilka iyo tirada Golayaasha Shacbiga)*

1) Dawladda Hoose waxaa maamul xubno lagu doorto habka uu tilmaamayo Sharciga Doorashada.

2) Xubnaha Golayaasha Shacbiga ee Degaanku waxay xilkaas haynayaan shan sano oo ka billaabata taariikhda la soo saaro natiijada doorashada. waxayna ka koobmaan tirada ku tilmaaman lifaaqa Sharcigan.

QOOBKA 6AAD

*(hakhsiyada qaanuuneed)*

Dawladda Hoose waa hay'ad qaran oo loo aasaasay horumarinta maamulka hoose, waxayna leedahay shakhsiyad qaanuuni ah iyo maamul madax bannaan oo ay ku fuliso xilkeeda Sharcigani tilmaamayo.

QODOBKA 7AAD

*(LA TASHI)*

Golayaasha Shacbiga ee Degaanka iyo Guddiyada Joogtada ah waxay shirkooda ugu yeeraan karaan aqoonyahanno iyo lataliyayaal xagga farsamada iyo sharciga, kuwaasoo doodaha ka qayb geli kara, hase yeeshee aan lahayn xaq cod.

QODOBKA 8AAD

*Ilaalinta guud ee Dawladaha* Hoose

1) Wasiirka Wasaaradda Dawladaha Hoose iyo Horumarinta Miyiga ayaa Sharcigan u xilsaaray inuu ilaaliyo danaha Dawladaha Hoose iyo hubinta xil gudashada Golayaasha Shacbiga ee Degaanka iyo Guddiyada Joogtada ah

2) Gudashada xilkaas, Wasiirka waxaa uga wakiil ah Guddoomiyaha Golaha Horumarinta ee Gobolka oo raacaya awaamiirta, tusaalooyinka iyo tilmaamaha Wasiirku uu ka bixiyo qabashada xilkaas.

3) Wasiirku wuxuu leeyahay awood uu ku ansixiyo ama uu ku baabi'iyo guddoonka ka soo baxa Golayaasha Shacbiga ee Degaanka iyo Guddiyada Joogtada ah, gaar ahaan :

a) guddoon kasta ee la xiriira canshuur iyo dakhli hor leh;

b) miisaaniyadda Dawladaha Hoose;

t ) arrimaha maamulka Shaqaalaha iyo kuwii ee Sharcigan si gaar ah loogu tilmaamay.

4) Dawladda Hoose ee Xamar waxay si toos ah u hoos timaaddaa Maadxootooyada J. D. S. oo ku leh awoodaha ku xusan lambarrada 1 iyo 3 ee Qodobkan.

## XUBINTA LABAAD

## HAWLAHA GOLAHA SHACBIGA EE DEGAANKA IYO XILKA KA DAWLAHA HOOSE

### QODOBKA 9AAD

(Ujeeddooyinka iyo astaanta Dawladda Hoose)

a) Ujeeddooyinka iyo xilalka Dawladaha Hoose waa kuwa soo socda :

1) daryeelka caafimaadka guud, gaar ahaan nadaafadda magaalooyinka iyo ka hortagga cudurrada faafa;

2) aasaasidda saaqyo badeeco iyo kuwo xoolaba;

3) kormeerka dhismooyinka cusub, kuwa la cusbooneysiinayo iyo kuwa u baahan in la dumiyo;

4) ka hortagga dhibaatada abaarta, duufaannada, fata-

ha webiyada, dabka halista ah iyo dhibaato kasta oo wax u dhimi karta Bulshada;

5) daadgureynta Dadweynaha, haddii dhibaato ku timaaddo;

6) diyaarinta iyo fulinta mashaariicda ama barnaamijyada lagu horumarinayo Bulshada: xag caafimaad, dhaqaale ama bulshaba;

7) Kordhinta tacabka, wax soo saarka iyo abuuridda ilo dhaqaale;

8) dhismo dugsiyada aasaasiga, kuwa quraanka iyo maamulkooda;

9) dhismo xarumaha xannaanada hooyada, dhallaanka iyo maamulkoodaba (MCH);

10) dhismo dugsiyada xannaanada caruurta, kuwa horumarinta qoyska iyo maamulkooda;

11) horumarinta faanka iyo isboortiga;

12) dhismo goobo biyo magaalooyinka iyo tuulooyinka dhexdooda;

12) dhismo goobo biyo magaalooyinka iyo tuulooyinka dhexdooda;

13) dhismaha iyo horumarinta hawlaha ileyska magaalooyinka;

14) sameynta iyo dayactirka waddooyinka dhexmara magaalooyinka degmada;

15) bilicsamida magaalooyinka iyo tuulooyinka iyo dejinta naqshadda degsiimada magaalooyinka degmadu ka kooban tahay (piano regolatore);

16) diiwaangelinta Dadweynaha degmada iyo xafidaadda diiwaannada dhalashada, dhimashada, guurka, furiinka iwm;

17) diiwaangelinta hantida ma guurtada ah ee Dadweynaha Degmada ku nool;

18) habeynta iyo ilaalinta maritaanka waddooyinka dhexmara magaalooyinka degmada;

19) habeynta ganacsiga loogu daneynayo dadweynaha;

20) maamulidda iyo kormeerka la xiriira horumarinta miyiga;

21) maamulidda mashaariicda lagu fulinaayo ISKAA WAX U QABSO;

22) habeynta hawlaha duugista.

b) Dawladaha Hoose waxay kaloo qaban karaan hawlaha soo socda :

3) daryeelka xoolaha iyo ugaarta;

2) ka hortagga nabaadguurka

1) horumarinta beeraha;

4) ka faa'iideysiga nacfiga dhirta iyo kalluunka;

5) dhismo guryo loogu talo galay Dadweynaha Degmada;

6) abaabulidda iyo habeynta gaadiidka Dadweynaha lagu qaado magaalooyinka dhexdooda;

7) aasaasidda hawlaha wargelinta degmada;

8) hawl kasta oo loogu danaynaayo Dadweynaha xag bulsho ama xag dhaqaale.

t) Dawlad Hoose kasta waa inay yeelataa astaan u gaar ah ee lagu aqoonsado Degmada, guddoonkeedana waxaa leh Golaha Shacbiga ee Degaanka. Dhaqan gelidda guddoonkaas wuxuu ku xiran yahay oggolaashaha Wasiirka.

### QODOBKA 10AAD

*(a)Hay'adaha Dawladda Hoose waa kuwa soo socda :*

1) Golaha Shacbiga ee Degaanka;

2) Guddiga Joogtada ah iyo

3) Guddoomiyaha Golaha Shacbiga ee Degaanka.

b) Dawladaha Hoose waxay kale oo yeelanayaan guddi-hoosaadyo iyo guddi tuulooyin oo hoos yimaada golaha Shicbiga ee Degaanka.

### QOOBKA 11AAD

### HAWLAHA GOLAHA SHACBIGA EE DEGAANKA)

HAWLAHA GOLAHA SHACBIGA EE DEEGAANKA WAXAA KA MID AH :

1) in ay gaaraan gaaraan go'aanno ay ku xaqiijinayaan gudashada xilalka iyo ujeeddooyinka loo dhisay Dawladda Hoose;

2) in ay ka abuuraan degmada gudaheeda hawlaha Sharcigan u xilsaarayo Dawladda Hoose iyo hawlihii kale ee u daneynaya Dadweynaha Degmada, Sharciguna oggol yahay;

3) in ay qaadaan tillaabooyin ku saabsan xagga maaliyadda si ay u fuliyaan xilkooda;

4) in ay dhawraan tilmaamaha Wasiirka Wasaaradda Dawladaha Hoose iyo Horumarinta Miyiga oo u xilsaaran ilaalinta guud ee Dawladaha Hoose;

5) in wada shaqayn buuxda la yeeshaan Dawladda Dhexe iyo Golaha Horumarinta ee Gobolka, si loo hubiyo dhawridda Sharciga iyo xasilloonida guud, loona gaaro maamul hagaagsan oo u daneynaya Dadweynaha.

**QODOBKA 12AAD**

*(Awoodda Golaha Shacbiga ee Degaanka)*

Golaha Shacbiga ee Degaanku, si uu u fuliyo ujeeddooyinka iyo hawlaha ku tilmaaman Qod. 9aad ee Sharcigan, wuxuu awood u leeyahay :

1) in uu bixiyo kharajka loo baahdo, kana yimaada fulinta hawlaha Dawladda Hoose;

2) in uu soo saaro go'aanno la socon kara Sharcigaan iyo Shuruucda kale ee Dalka oo la xiriira hab raac dhan maamul iyo dhan fulinba;

3) in uu xaqiijiyo uruurinta canshuuraha, qaraamaadka iyo wixii xuquuq kale ah oo Sharcigan ama shuruuc kale ay siinayaan Dawladda Hoose iyo dakhli kasta oo ka yimaadda hawlaha ay qabato Dawladda Hoose;

4) talo ku soo jeedinta la wareegidda hanti dad kale leeyahay, dan guud awgeed, isagoo weydiisanaya hay'adda Dawladda ee ku shaqo leh, mar walbana la tixgelinayo cawilcelinta ku tilmaaman Qod. 28—3 ee Dastuurka;

5) in uu kormeer iyo baaritaan ku sameeyo habsami u socodka hawlaha Dawladda Hoose;

6) wuxuu guddoomin karaa heshiisyo ay Dawladda Hoose dhinac ka tahay ee ku koobaan heer qaran.

7) wuxuu qaadan karaa amaah ka dib markuu oggolaansho ka helo Wasiirka.

**QODOBKA 13AAD**

*(Doorashada Guddiga Joogtada ah, Guddoomiyaha)*

*Golaha Degaanka iyo Ku-Xigeenkiisa)*

1) Guddiga Joogtada ah, Guddoomiyaha iyo Ku-Xigeenkiisa waxaa soo sharxaaya Xisbiga iyadoo laga dhax xulayo xubnaha Golaha Shacbiga ee Degaanka, Goluhuna wuxuu ku dooranaya cod hal dheeri ah shirkiisa ugu horreeya.

2) Guddiga joogtada ee Golayaasha Shacbiga ee Degaannadu waxay ka kooban yihiin :

— Magaalada Muqdishu : Duqa Magaaladda iyo 10 xubnood

— Golayaasha ka kooban 21ka xubnood : Guddoomiyaha iyo 5 xubnood

— Golayaasha ka kooban 13 xubnood : Guddoomiyaha iyo 3 xubnood

3) Shirka ugu horeeya ee Golaha Shacbiga ee Degaanka shirguddoomiye waxaa ka noqonaya Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Degmada, midka magaalada Xamarna, Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Gobolka Benaadir.

4) Guddoomiyaha iyo Guddiga Joogtada ah waxaa jagada laga qaadi karaa, muddada xilkooda ka hor, haddii ay jiraan sababo macquul ah, ama kalsooni darro awgeed ay sidaas ku soo jeediyaan, iyadoo sababaysan, seddex meelood xubnaha Golaha Shacbiga ee Degaanka, ayna oggolaadaan seddex meelood laba. Go'aankaas wuxuu dhaqan galayaa marka uu Wasiirku oggolaado, isagoo dhegeystay Guddiga Fulinta ee Gobolka.

5) Dawladda Hoose ee Xamar waxay yeelan kartaa hal Ku-Xigeen ka badan.

6) Iyagoo ay sidoodii u taagnaanayaan lambarada 1 iyo 4 ee Qodobkan, inta ka saamayn karta Dawladda Hoose ee Xamar, Madaxweynaha JDS wuxuu Duqa Magaaladda Xamar iyo Ku-Xigeennadiisa u magacaabi karaa dad aan ka tirsanayn Golaheeda Shacbi.

## QODOBKA 14AAD

### *(Hawsha Guddiga Joogtada ah)*

1) Guddiga Joogtada ah wuxuu fuliyaa hawlaha Golaha Shacbiga ee Degaanka muddada u dhexeysa kal-fadhiyada.

2) Guddiga Joogtada ah wuxuu u bandhigayaa hawlaha uu qabto Golaha Shacbiga si loo ansixiyo.

### QO*D*OBKA *15*AA*D*

*(***Xilk***a iyo awoo***dd***a* **Gu***ddoomi***y***a***h***a* **G***o***l***a***h***a S***h***a***c***bi***g***a ee* **De***-gaanka)*

1) Guddoomiyaha Golaha Degaanka waa Sarkaalka u sarreeya maamulka Dawladda Hoose, wuxuuna :

a) matilaa maamulka Dawladda Hoose iyo kan Golaha Shacbiga ee Degaanka;

b) isugu yeeraa, guddoomiyaana, shirarka kalfadhiyada Golaha Shacbiga ee Degaanka, Guddiga Joogtada ah iyo Guddi hoosaadyada, haddii uu guddoomiye ku yahay;

t ) leeyahay saxiixa warqadaha rasmiga ah ee ka soo baxa Dawladda Hoose.

2) Haddii ay timaaddo baahi degdeg ah oo suurtagelin weyda in laysugu yeero Golaha Shacbiga ee Degaanka ama Guddiga Joogtada ah, Guddoomiyuhu, isagoo dhegeystay Xoghayaha Dawladda Hoose, wuxuu guddoominayaa hawlo ay leeyihiin Golaha Shacbiga ee Degaanka ama Guddiga Joogtada ah.

3) Guddoomiyuhu waa in uu soo hordhigaa Guddiga Joogtada ah ama Golaha Shacbiga, Shirkooda ugu horreeya, go'aannada uu gaaray ee ku saabsan arrimaha ku xusan lambarka 2aad ee Qodobkan si loo ansixiyo.

### QO*D*OBKA *16*AA*D*

**X***ilka* *iyo awoodda* *k***u** **X***igeenka* **Gudd***oomiyaha* **G***olaha Degaan-ka)*

1) Markii uu maqnaado Guddoomiyaha Golaha Degaanku ama uu gudan kari waayo xilkiisa, waxaa xilkiisa iyo hawshiisa sii fulinaya ku xigeenka Guddoomiyaha.

2) Kuxigeenka Guddoomiyuhu wux uukaloo qabanayaa hawlihii kale ee Guddoomiyuhu u xilsaaro.

## QODOBKA 17AAD

## GUDDI HOOSAADYO)

1) Golaha Shacbigu wuxuu yeelanayaa guddi hoosaadyada soo socda oo ka koobnaan kara Madaxda Laamaha Dawladda ee hawl ahaan u qaabilsan :

a) Guddi hoosaadka dhaqaalaha iyo iskaashatooyinka oo u qaabilsan horumarinta dhaqaalaha iyo fulinta mashaariicda, iskuduwidda iyo dhiirrigelinta mashaariicda Iskaa Wax u qabso, wax soosaarka iyo iibgeynta tacabka, abuurista iskaashatooyinka, xannaanada iyo kobcinta xoolaha;

b) Guddi hoosaadka arrimaha bulshada oo u xilsaaran caafimaadka, nadaafadda, waxbarashada, ciyaaraha, isboortiga, fanka, suugaanta, iwm.

2) Golaha Degaanku wuxuu iska dhex magacaabi karaa, markii loo baahdo, guddi gaar ah oo soo baara ama talo ka soo jeediyo arrin deg deg ah oo mudnaansho gaar ah u leh socodsiinta maamulka Dawladda Hoose.

3) Guddi hoosaadkasta xubnihiisu waa in ayan ka yaraan saddex hase yeeshee qofku waa ka noqon karaa xubin guddi.

4) Guddi hoosaad kasta waxaa guddoomiye u noqnaaya Golaha Degaanka ama Xubin ka mid ah Guddiga Joogtada ah oo Guddoomiyuhu magacaabo.

## QODOBKA 18AAD

## (Guddiga tuulada)

1) Guddiyada tuulooyinka waxaa lagu dhisaa guddoon Golaha Shacbiga ee Degaanka iyadoo ay talada dhismaha soojeedinteeda yeelanayaan Guddiga Joogtada ah, waana in ay ka koobnaadaan Wakiillo ka socda beesho tuulada ka tirsan tahay.

2) Beesha joogto ahaan u deggan tuulada waxay sannadkiiba mar soo dooranayaan guddigooda maamul oo aan ka badnaan karin toddoba xubnood.

3) Guddoomiyaha Golaha Degaanku, marka uu dhegeysto talada Guddiga tuulada, wuxuu xubnaha Guddiga ka dhex magacaabayaa Guddoomiyaha Guddiga Tuulada Xoghayaha iyo Lacag-hayaha.

### QODOBKA 19AAD

*(Shirka Golaha Shacbiga ee Degaanka, guddi hoosaadyada iyo kuwa tuulooyinka)*

1) Fadhiga ugu horreeya ee Golaha Shacbiga ee Degaanka waxaa xaddidaya Wasiirka, waxaana la qabanayaa 30 maalmood gudahood laga billaabo maalinta ku dhawaaqidda natiijada doorashada.

2) Shirarka kale ee Golaha Shacbiga ee Degaanka iyo guddiyada kale waxaa isugu yeeraya Guddoomiyaha Golaha Degaanka.

3) Golaha Shacbiga ee Degaanka, guddi hoosaadyada iyo guddiyada tuulooyinku waa in ay kulmaan, ugu yaraan, saddexdii biloodba mar, Guddiga Joogtada ahna waa inuu kulmaa bishiiba mar ugu yaraan.

4) Golaha Shacbiga ee Degaanku wuxuu isugu iman karaa shir aan caadi ahayn, haddii ay sidaas la noqoto Guddoomiyaha ama ay weydiistaan saddex meelood meel Xubnaha Goluhu.

5) Shirka Golayaasha Shacbiga ee Degaannada iyo kuwa guddiyada, Dadweynaha waa u furan yihiin, hase yeeshee markii ay jiraan sabab la garowsan karo, shirkaas albaabada waa loo xiri karaa.

6) Habka cod bixinta shirarku waxay noqonayaan gacan taag.

### QODOBKA 20AAD

(Anshaxnimada Shirarka)

1) Shirarka Golaha Shacbiga ee Degaanka iyo kuwa Guddiyada kale waxay ansaxayaan marka ay ka soo qayb galaan bar hal dheer yahay ee xubnahooda.

2) Go'aanka waxaa lagu gaarayaa cod hal dheeri ah, haddii sharcigu uusan tiro kale sheegin.

### QODOBKA 21AAD

Hadalqoraalka iyo diiwaangelintooda)

1) Dhammaan shirarka Golayaasha Shacbiga ee Degaanka iyo guddiyada kale waa in laga goraa hadal qoraal.

2) Hadal qoraalkaas waa in la diiwaan geliyaa, meel hubanti ahna lagu hayaa, iyadoo uu ka masuul noqonaaya Xoghayaha Dawladda Hoose .

3) Hadalqoraalka Golaha Shacbiga ee Degaanka iyo kan Guddiga Joogtada ah waxaa qaadaya Xoghayaha Dawladda Hoose, wuxuuna xaq u leeyahay in uu ra'yigiisa ka dhiibto Shirarka, isagoo aan lahayn xaq codbixin.

### QO*D*OBKA *22*AA*D*

*(Kharajka shirarka Golayaasha Shacbiga ee Degaannada iyo Guddiyada Kale)*

1) Shaqada Xubnaha Golaha Shacbiga ee Degaanka iyo Guddiyada kale waa tabaruc, wax mushaar ah oo lagu qaatana ma jirto, markii laga reebo Guddiga Joogtada ah.

2) Inta ay socoto hawsha Golaha Shacbiga ee Degaanku, Xubnaha Goluhu waxay xaq u leeyihiin gunno lagu caddeyn doono Xeer uu soo saaro Wasiirku, isagoo la tashaday Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda.

3) Gunnada ku tilmaaman lambarrada hore ee qodobkan waxaa laga bixinayaa miisaaniyadda Dawladaha Hoose.

### QO*D*OBKA *23*AA*D*

*(Xiriirka Golaha Shacbiga ee Degaanka iyo Xisbiga)*

Xiriirka ka dhexeeya Golayaasha Shacbiga ee Degaanka iyo Xisbiga waxaa gundhig u ah :

i ) Dastuurka Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya;

ii) Sharciga tirsigiisu yahay 35 ee 25. 1. 1977 oo u habeynaya xiriirkaas sida soo socota :

a) Xisbiga oo leh :

— dejinta siyaasadda guud ee Dalka;

— guddoominta qorshaha dhaqaalaha, bulshada iyo difaaca;

— Kormeerka iyo tusaale ka bixinta habka hirgelintooda.

b) Maamulka oo leh :

— hirgelinta mashaariicda dhaqaalaha;
— baahinta tacliinta
— daryeelka caafimaadka dadka iyo xoolaha;
— fulinta iyo socodsiinta hawl kasta oo Shuruucda iyo Guddoonka Xisbigu u xil saaran.

### QODOBKA 24AAD

*(Xiriirka Golaha Shacbiga Degaanka iyo Dawladda)*

1) Xiriirka ka dhexeeya Golayaasha Shacbiga ee Degaanka iyo Dawladda waxaa gundhig u ah :

i) Dastuurka oo tilmaamaya in awoodda Dawladaha Hoose ay ka mid tahay tan Dawladda Dhexe;

ii) Shuruucda iyo Xeerarka jira oo awood u siinaya Maamulka Dhexe ee Dawladdu in uu leeyahay maamulka hoose awaamiir, tusaale iyo tilmaamo la xiriira fulinta hawl maalmeedka Maamulka Hoose.

2) Xiriirka isaga ah Dawladda waxaa wakiil uga ah Wasaaradda Dawladaha Hoose iyo Horumrinta Miyiga.

## XUBINTA 3AAD

## XUQUUQDA QAANUUNIGA AH IYO TAN DHAQAALAHA EE SHAQAALAHA DAWLADDA HOOSE

### QODOBKA 25AAD

*(Shaqaalaha Dawladda Hoose)*

Shuruudaha shaqada, xuquuqda qaanuuniga ah iyo tan dhaqaalaha ee shaqaalaha Dawladda Hoose waxay ku habeysan yihiin Xeer u gaar ah oo uu saaro Madaxweynaha Jamhuuriyadda Dimoqraadiga Soomaaliya.

## QODOBKA 26AAD

*(Xoghayaha Dawladda Hoose)*

1) Dawlad kasta ee Hoose waxay yeelanaysaa Xoghaye Dawladda Hoose oo uu magacaabo Wasiirku.

2) Xoghayaha iyo Shaqaalaha Dawladda Hoose waxay hoos imanayaan Guddoomiyaha Golaha Degaanka.

3) Xoghayaha iyo Shaqaalaha Kale waxay mas'uul ka yihiin fulinta awaamiirta uu siiyo Guddoomiyuhu ee waafaqsan sharcigan, sharciyada kale ee Dalka iyo tusaalaha Wasiirka.

4) Xoghayaha Dawladda Hoose waa Maamulaha Lacagta ee Golaha Shacbiga Degaank.

5) Xoghayaha Dawladda Hoose wuxuu madax u yahay shaqaalaha Dawladda Hoose.

## QODOBKA 27AAD

(XILKA XOGHAYAHA DAWLADDA HOOSE

Xoghayaha Dawladda Hoose wuxuu u xilsaaran yahay :

a) fulinta sharciyada u degsan maamulka Dawladda Hoose iyo awaamiirta Guddoomiyaha Golaha Degaanka;

b) habeynta miisaaniyadda Dawladda Hoose, gurista canshuuraha iyo xuquuqda kale ee Dawladda Hoose;

t ) xafidaadda iyo ilaalinta kharajka iyo dakhliga miisaaniyadda Dawladda Hoose;

j ) fulinta mashaariicda;

x) ka qayb qaadashada fulinta, fidinta iyo ballaarinta Barnaamijka Horumarinta Miyiga iyo badbaadinta Degaanka;

kh) xannaanada iyo anshaxa shaqaalaha Dawladda Hoose;

d) keydinta qoraallada iyo dokumentooyinka kale ee Golaha Shacbiga ee Degaanka iyo Guddiga Joogtada ah

r ) hawlihii kale ee Golaha Shacbiga ee Degaanka iyo Guddoomiyuhu u xilsaaraan.

XUBINTA *4AAD*

DAKHLIGA, KHARAJKA IYO XISAABAADKA DOWLADAHA HOOSE

QODOBKA *28AAD*

(*H* A N T I *D* A)

1) Hantida Dawadda Hoose waa hanti Qaran, waxaana loo isticmaali karaa ujeeddo Qaran oo keliya.

2) Iyadoo waafaqsan gudashada xilkooda, Dawladaha Hoose waxay :

a) maamuli karaan hay'ado hoos yimaado oo hawshooku kooban tahay degaanka;

b) samayn karaan ganacsi, dhismo hay'ado hoos yimaada amase ku dhaqaaqi karaan tillaaba kasta ee ugu jirto dan dhaqaale deegaankooda.

QODOBKA *29AAD*

(M I *I* S A A N I Y A *D* *D* A)

1) Miisaaniyadda ku talo galka ah ee Dawladda Hoose iyo hay'adaha hoos yimaada waxay ka mid tahay miisaaniyadda guud ee Qaranka ,waxayna tahay saldhigga dhaqaalaha Dawladda Hoose.

2) Sannad kasta maamulka Dawlad Hoose kasta wuxuu diyaarinayaa miisaaniyadda ku talo galka ee sannadka soo socda, iyadoo la raacayo qaabka, habka iyo tilmaamaha Wasaaradda Maaliyaddu ay ka bixiso arrintaas. Miisaaniyaddaas waxay ka kooban tahay :

b) qoraal faahfaahinaayo miisaaniyadda;

t ) xisaab xirka lixda bilood ee sannadka soo socda.

3) Miisaaniyadda ku talo-galka waxaa la hordhigayaa Shacbiga Degaanka oo leh awoodda oggolaanshaha, waxaana loo gudbinayaa Golaha Horumarinta ee Gobolka ugu dambeystii 30ka Setembere.

4) Golaha Horumarinta Gobolku wuxuu ku soo lifaaqayaa hadal qoraalladiisa ku saabsan miisaaniyadda, ka dibna wuxuu u gudbinayaa Wasaaradda Dawladaha Hoose iyo Horumarinta Miyiga ugu dambeystii 15ka Oktoobar.

5) Miisaaniyadaha Dawladaha Hoose waxay dhaqan gelayaan marka uu Golaha Shacbigu oggolaado.

6) Haddii ay muuqato Maamulka Dawladaha Hoose inuu soo saari karo lixda bilood oo dambe ee sannadka dakhli dheeraad ah, waxaa loo oggol yahay inuu soo samaysto miisaaniyad ku celis ah oo oggolaashaheeda leedahay Wasaaradda Dawladaha Hoose iyo Horumarinta Miyiga.

7) Haddii baahi timaaddo waxaa lixda bilood oo dambe Golaha Shacbiga eeDegaanku guddoomin karaa kala wareejin lacageed taasoo awooddeeda oggolaansho la kala leeyahay sida soo socta :

a) kala wareejinta dhex marta laba madax xigeen oo isku madax ah waxaa lagu sameynayaa go'aan ka soo baxa Wasiirka, isagoo la tashaday Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda;

b) kala wareejinta dhexmarta laba xaraf madax-xige ah waxaa awood u leh Guddoomiyaha Golaha Horumarinta ee Gobolka.

8) Dawladaha Hoose waa in sannad kasta ay sameeyaan xisaab xir sanadeed oo guddoonkeeda uu yeelanaayo Golaha Shacbiga ee Degaanku, waana in loo gudbiyaa

Guddoomiyaha Golaha Horumarinta Gobolka oo u gudbinayo Wasiirka ugu dambeyn 30ka Maarso ee sannad kasta, isagoo raacinaya warbixin iyo wixii ra'yi ah uu ka qabo. Ansaxidda xisaab-xirkaas waxaa leh Wasiirka.

**QODOBKA *30AAD***

**(*D* A K H L I G A)**

Dakhliga Dawladaha Hoose wuxuu ka kooban :

a) canshuuraadka iyo xuquuqda ku qoran lifaaqa (B) ee Sharcigan iyo wixii kale oo loogu oggolaado sharci iyo Xeer Dawladeed;

b) macaashka ganacsiga ay samayso;

t) dakhliga ka soo gala ilo dhaqaale oo ay abuurtay ama hawlaha Dadweynaha u qabato;

j) deeqda ay ka hesho Dawladda Dhexe, dibadda iyo dadweynaha;

x) amaahda ay ka helaan Dalka gudihiisa ama dibaddiisa haddii loo oggolaado

**(QO*DO*B*K*A *31*AA*D*)**

**(HA*B*KA C*A*NSHUR SAAR*ID*DA)**

1) Golaha Shacbiga ee Degaanku marka canshuuraha ama xuquuqda kale ee Sharcigu u oggol yahay midood ama qayb ka mid ah uurabo in uu ku dabaqo degaanka, waa inuu guddoonkiisa ku caddeeyaa :

a) cadadda canshuurta, qaraamaadka iyo xuquuqda kale isagoo qaddarinaaya xadka sharciga arrintaas ku saabsani uu tilmaamayo;

b) taariikhda canshuurta, qaraamaadka iyo xuquuqda kale bixintoodu ay waajib noqonayso.

2) Si uu u dhaqan galo guddoonkaasi waxaa loo baahan yahay oggolaashaha Wasiirka.

## QODOBKA 32AAD

## (URURINTA DAKHLIGA)

1) Dakhliga Dawladda Hoose waxaa lagu ururiyaa lacag caddaan ah.

2) Lacag kasta oo la qabto waa in laga bixiyaa rasiid (warqadda lacag qabashda loogu tala galay).

## QODOBKA 33AAD

## (K H A R A J K A)

1) Dawladaha Hoose waxay bixin karaan kharajka loogu oggolaaday miisaaniyadda oo noqon kara :

a) kharajka loogu tala galay socodsiinta hawlaha caadiga ah.

b) kharajka hirgelinta mashaariicda horumarinta bulshada Deegaanka

t) kharaj ah deeq iyo kaalmo.

2) Kharaj kasta ee la bixinayo waa in loo sameeyaa xaashida lacag bixinta ee loogu talo galay oo ay ku lifaaqan yihiin dokumenti caddeynaya kharajka, waana in ay saxiixaan dadka Sharcigu tilmaamayo iyo qofka lacagta qaadanaya, waana in ay waafaqsanaadaa Sharciga iyo Xeerka Xisaabaadka Dawladda.

## QODOBKA 34AAD

## (HABKA XISAABAADKA)

1) Maamulka Dawladaha Hoose waa in ay ku dhaqmaan hab xisaabeed waafaqsan Sharciga iyo nidaamka Dawladda iyo Hay'adaha bannaan, waana in habkaas xisaabeed si hufan u qeexaa maamulka hantida Dawladda Hoose.

2) Maamulka Dawladaha Hoose waa in b bil kasta gudbiyaa Golaha Horumarinta ee Golbolka, Wasaaradda Dawladaha Hoose iyo Horumarinta Miyiga iyo Wasaaradda Maaliyadda xisaab celin misaaniyadeed.

### QODOBKA 35AAD

### (MAS'UULIYADDA XISAABEED)

1) Marka laga reebo mas'uuliyadda ciqaabeed ee ka iman karta, qof kasta ee bixiya ama amar in la bixiyo kharaj aan sharciga waafaqsanayn ama feejignaan la'aan darteed sabab u noqda maqnaasho hanti Dawladda Hoose leedahay waxaa khasab ku ah inuu soo celiyo hantida la bixiyey ama maqan.

2) Mas'uuliyadda soo celinta hantida ku xusan lambarka 1aad ee Qodobkan waxay ku dhacaysaa qofka bixiyey ama mas'uul ka ah maqnaashaheeda, haddii uusan amar qoran ka haysan Golaha Shacbiga Degaanka ama Guddiga Joogtada ah. Markaas mas'uulyadda soo celinta waxay ku dhacaysaa xubnaha Golaha Shacbiga ee Degaanka ama xubnaha Guddiga Joogtada ah, ee oggolaaday bixinta hantida ku baxday sharci darrada.

3) Haddii laysku khilaafo sharci waafaqsanaanta bixin hanti loogana dooday shirka golaha shacbiga ee Deegaanka ama guddiga joogtada ah, Xoghayaha Dawladda Hoose ama qofka u xilsaaran hadal qoraalka waxaa waajibka ku ah in uu diiwaan iyo magacyada hubnaha oggolaaday bixinta hantidaas.

4) Xaaladaha aan ku xusnayn Sharcigan, Dawladaha Hoose waxay ku dhaqmayaan Sharciga iyo Xeerarka Xisaabaadka Dawladda.

### QODOBKA 36AAD

### *(Habka soo Celinta Hantida)*

Soo celinta hantida ku xusan Qodobka 35aad ee Sharcigan waxaa amraya Wasiirka ama Guddoomiyaha Golaha Horumarinta ee Gobolka oo waajib tahay in loo banadhigo.

### QODOBKA 37AAD

*(Kormeerka iyo Baarista Miisaaniyadda)*

1) Wasaaradda Dawladaha Hoose iyo Horumarinta Miyiga iyo Hay'adaha kale ee sharcigu u oggol yahay waxay ku leeyihiin kormeer iyo baaris miisaaniyadda Dawladaha Hoose iyo xisaabaadkooda.

2) Haddii Hay'adda kormeerka iyo baarista samaysay aysan ahayn Wasaaradda Dawladaha Hoose iyo Horumarinta Miyiga, waxaa waajib ku ah inay si deg deg ah ugu gudbiso warbixin tifaftiran Wasaaradda Dawladaha Hoose iyo Horumarinta Miyiga, iyadoo dhowraysa waqtiga iyo habka uu tilmaamayo Xeerka Xisaabaadka Dawladda.

### XUBINTA 5AAD

### HESHIISYADA

### QODOBKA 38AAD

*(Saxiixa Heshiisyada)*

1) Heshiisyada Dawladd aHoose dhinac ka tahay waxaa saxiixaya Guddoomiyaha Golaha Degaanka, isagoo goob joog uu ka yahay Xoghayaha Dawladda Hoose, kaasoo ku dhufanaaya shabadda Dawladda Hoose mas'uulna ka yahay Xafidaadda heshiiska diiwaangelintiisa, Iwm.

2) Heshiisyada la sameeyo iyadoon la dhawrin shuruudaha ku sheegan lambarka 1aad ee Qodobkan waa baaba' waxna kama dhalanaayaan.

### QODOBKA 39AAD

*(Q a n d a r aa s k a)*

1) Heshiisyada ku saabsan gadashada alaabta, qalabka, qabashada shaqad aiyo socodsiinta hawlaha la xiriira maamulka Dawldda Hoose waxaa **oggolaanshaheeda** leh guddiga joogtada ah haddii lacagta ku baxeysa

ayan ka badneyn Shs. 15.000 Haddii ay lacagtu inta la sheegay ka badan tahay waa in toban maalmood ka hor l oobandhigaa Dadweynaha, lan afaafiyaa, iyadoo qandaraaska lagu dhejinayo meelaha ay Dawladda Hoose ugu talo gashay wargelinta iyo meelaha la garto in ay ku habboon yihiin.

2) Araajida naadada qandaraaska waa loo soo bandhigaa Guddiga joogtada ah oo heshiiska guddoonsiinaya ka soo qeyb galayaasha qandaraas qofka ugu lacag yar ama ugu farsamo fiican oo la hubiyey lacagta uu sheegtay in ay tahay mi dmacquul ah.

3) Haddii lacagta qandaraasku ay ka kooban tahay Shs. 5.000, waxaa loo baahan yahay guddoonka Golaha Shacbiga ee Degaanka iyo oggolaanshaha Guddoomiyaha Golaha horumarinta Gobolka. Haddii lacagta qandraasku ay ka badan tahay Shs. 100.000, waxaa loo baahan yahay oggolaanshaha Wasiirka.

4) Arrimaha ku xusan lambarka 3aad ee Qodobkan ma saameeyaan Dawladda Hoose ee Xamar.

## XUBINTA *6AAD*

## KALA DIR*IDDA* GOLAH*A SHACBIG* A*E*E *D*EGAANKA IYO GU*DD*IY*AD*A

### QODOBKA *40AAD*

(Awoodda kala diridda Golaha Shacbiga ee Degaanka)

Haddii Golaha Shacbiga ee Degaanku awocdi kari waayo inuu guto hawlaha Sharcigan u xilsaaray, Madaxweynaha J. D. S. isagoo dhegeystay talada Wasiirka, wuxuu kala dirayaa Golaha Shacbiga ee Degaanka, isagoo soo saaraya go'aan sababaysan, wuxuuna magacaabayaa sarkaal ku-meel gaar ah oo fuliya hawlaha Golihii la kala diray, ilaa laga dooranayo Gole cusub oo muddada doorashadiisu uu xaddidayo Golaha Wasiirraddu.

## QODOBKA *41AAD*

*(Ka dhicidda iyo ka noqoshada Xubinnimada Golaha Shacbiga ee Degaanka)*

1) Xubinta Golaha Shacbiga ee Degaanka ee lumiya shuruudaha uu tilmaamayo Sharciga Doorashada, ama gudan waayo xilkiisa waxaa lagu caddeynayaa inuu ka dhacay xubinnimada, waxaana Xeer ku soo saaraya Madaxweynaha ka dib marka uu helo talada Wasiirka oo dhegeystay Guddoomiyaha Golaha Horumarinta Gobolka.

2) Xubinta Golaha Shacbiga Degaanka ee la timaadda codsi sababaysan waa laga oggolaan karaa ka tanaasulidda xubinnimada Golaha Shacbiga ee Degaanka.

## QODOBKA *42AAD*

*(Xilka qaadidda xubin guddi hoosaadyada iyo kuwa tuulooyinka)*

1) Xubin kasta oo ka mid ah Guddi Hoosaadyada iyo kuwa tuulooyinka waxaa Guddiga ka saari kara Golaha Shacbiga ee Degaanka, haddii uu ka soo bixi waayo xila Sharcigan tilmaamaayo iyo xeerka faahfaahinaayo Sharcigan.

2) Go'aanka ka saariddu waa inuu mar walba sabab cad yeeshaa.

3) Xubinta laga saaro Guddiyada lamabrka 1aad Qodobkaa ku tilmaaman, waxaa meeshiisa lagu magacaabayaa xubin kale oo cusub. Guddiga joogtada ah wuxuu awood u leeyahay inuu xubnaha Guddiyada kor ku tilmaaman ka joojiya xilk ailaa iyo inta uu ka helaayo oggolaanshaha ka saaridda ee Golah aShacbiga ee Degaanka.

## XUBINTA 7AAD

## C I Q A A B A A D

### QODOBKA 43AAD

### (CIQAABAHA)

1) Haddii sharci ama xeer si kale loogu sheegin, qof kasta:

a) oo u hogaansami waaya guddoon ka s oofulay Golaha Shacbiga ee Degaanka;

b) ama aan fulin amar sharcigan waaqafsan oo uu soo saaro Guddoomiyaha Golaha Degaanka, Xoghayaha Dawladda Hoose ama Madax Qeyb, waxaa lagu ciqaabayaa, hadduusan falkaasu neqon dembi ka sii weyn, ganaax ba bilowda Shs. 5 (shan) ilaa Shs. 500. (shanboqol). Hase yeeshee haddii gafku ku saabsan yahay u hoggaansamid la'aan guddoon la xiriira xasiloonida ama caafimaadka guud, xad-gudbaha waxaa lagu ciqaabayaa il aa3 (seddex) bilood oo xarig ah ama ilaa Shs. 3.000 (seddexkun) oo ganaax ah ama labada oo laysugu daro.

2) Xad-gudubka ku xusan lambarka hore ee qodobkan, ciqaabtiisu'na tahay ganaax kaliya, Xad-gudbuhu wuxuu ku dhameyn karaa hessiis isagoo 7 (todoba) maalmood gudahood oo ka bilaabata maalinta la gaarsiiyo falka loo heysto, ku bixinaya, lacag dhiganta barka ganaaxa u yar ee u dhigan xad-gudubka uu ku kacay.

3) Lacagta lagu uruuriyo habka ku tilmaaman lambarka 2aad ee qodobkan waxey ka mi dnoqoneysaa dakhliga Dawladda Hoose, xuquuqda ay ku yeelanayaan shaqaalaha khuseeyana waxaa loola raacayaa sharciyada ka yaala.

### QODOBKA 44AAD

*(Xaddidaadda Ciqaabta)*

1.) Guddiga joogtada ah ayaa leh Xaddidaadda ciqaabta la muteysan karo markii lagu xad gudbo guddoonka iyo amarrada ku sheegan qodobka hore, iyadoo marna aan la dhaafi karin xuduudda kor ku tilmaaman.

2) Go'aanka Guddiga joogtada ah ee lambarka 1aad ee qodobkan waxaa ansaxinaya ama diidaya Golaha Shacbiga ee Degaanka.

## XUBINTA 8AAD

## GOLAYAASHA HORUMARINTA, XILKOODA IYO AWOODOO.

### QODOBKA 45AAD

*Golaha horumarinta gobolka*

a) Gobal kasta waxaa laga dhisay Guddi lagu magacaabo Golaha Horumarinta Gobolka.

b) Golaha Horumarinta Gobolka Banaadir wuxuu ka koobmaa Xubnaha soo socda :

1) Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Gobolka Guddoomiye,

2) Duqa Magaalada Xamar Xubin;

3) Kaaliyaha 1aad ee Xoghayaha Xisbiga Gbolka »

4) Kaaliyaha 2aad ee Xoghayaha Guddiga Xisbiga Gobolka »

5) Xoghayayaasha Guddiyada Xisbiga Degmooyinka Gobolka »

6) Guddoomiyayaasha Ururrada Bulshada ee Gobolka »

7) Xoghayaha Dawladda Hoose (Maamulaha Lacagta ee Gobolka) »

8) Taliyaha Ciidanka Xoogga Dalka ee Gobolka »

9) Taliyaha Qaybta Booliska ee Gobolka »

10) Taliyaha Ciidanka Nabadsugidda ee Gobolka »
11) Taliyaha Ciidanka ASLUUBTA ee Gobolka »

12) Taliyaha Ciidanka Guulwadayaasha Ummadda ee Gobolka »

13) Isuduwaha Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta ee Gobolka »

14) Isuduwaha Wasaaradda Caafimaadka ee Gobolka »

15) Isuduwaha Wasaaradda Hawlaha Guud ee Gobolka »

16) Isuduwaha Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha ee Gobolka »

17) Isuduwaha Wasaaradda Xannaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa »

18) Madaxa Xafiiska Guddiga Qorsheynta Qaranka ee Gobolka »

**QODOBKA *46AAD***

*(Xilka Golaha Horumarinta ee Gobolka)*

Golaha Horumarinta ee Gobolka waxaa xilkiisu yahay:

1) Isuduwidda qorshaha Degmooyinka;

2) Isuduwidda Laamaha Dawladda;

3) Nabedgelyada Gobolka;

) Kormeerka iyo hubsashada hawlaha Degmooyinka;

5) guddoominta miisaaniyadda Dawladaha Hoose.

### QODOBKA 47AAD

**(Guddiga Fulinta)**

1) Gobol kasta waxaa ka dhisan guddi lagu magacaabo Guddiga fulinta oo hoos yimaada Golaha Horumarinta ee Gobolka, wuxuuna ka kooban yahay:

1) Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Gobolka Guddoomiye;

2) Kaaliyaha Siyaasadda ee Gobolka Xubin;

3) Kaaliyaha Maamulka ee Gobolka Xubin;

2) Xika Guddiga Fulinta wuxuu yahay:

a) Fulinta guddoonka Golaha Horumarinta ee Gobolka muddada u dhexeysa Kalfadhiyada Golaha;

b) diyaarinta ajendaha iyo hawl maalmeedka Gobolka Horumarinta ee Gobolka oo la xiriira hawlaha Sharcigan loogu xilsaaray;

t) ansixinta guddoonka ka soo fula Goloyaasha Shacbiga ee Degaanka isagoo matilaya Wasiirka Wasaaradda Dawladaha Hoose iyo Horumarinta Miyiga.

### QODOBKA 48AAD

**(Xilka iyo awoodda Guddoomiyaha Golaha Horumarinta ee Gobolka)**

1) Guddoomiyaha Golaha HorumarintaGobolka oo ah Sarkaalka ugu sareeya siyaasadda iyo maamulka Gobolka waxaa noqonaya Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Gobolka, waxaana magacaabaya Xoghayaha Guud ee X.H.K.S. isagoo dhegeystay talada Golaha Hoggaannada Xisbiga.

2) Guddoomiyuh uwuxuu matilaa danta guud ee Qaranka, Xisbiga iyo Dawladda, wuxuuna ka qaataa awaamirta iyo talooyinka la xiriira maamulka Gobolka iyo Degmooyinka Wasiirka Dawladaha Hoose iyo Horuma-

rinta Miyiga. Hase yeeshee wuxuu xiriir toos ah la yeelan karaa Hey'adaha Xisbiga iyo kuwa Dawladda oo dhan, wuxuuna isku dubbaridaa hawlaha mashaariicda ay Dawladdu ku fulineyso Gobolka.

3.) Guddoomiyuhu wuxuu xiriir toos ah kala yeelan karaa Madaxweynaha J.D.S. arrimaha la xiriira siyaasadda iyo nabadgelyada Gobolka, isaguna masuul toos ah uga yahay, wuxuuna ku leeyahay Talisyada ku shaqo leh nabadgelyada awood buuxda xagga nabadgelyada iyo xasilloonida guud ee Gobolka.

QODOBKA 49AAD

*(Kaaliyaha Siyaasadda iyo kan maamulka))*

1) Kaaliyaha Xoghayaha Guddiga ee Gobolka dhanka siyaasadda xilkiisa iyo awooddiisa waxaa tilmaamaya sharciyadii iyo xeerarkii hore u jiray.

2) Golaha Horumarinta Gobolka wuxuu yeelanayaa Kaaliye dhank amaamulka waxaana magacaabaya Madaxweynaha J.D.S. ka dib markuu dhageystosoo jeedinta Wasiirka Dawladaha Hoose iyo Horumarinta Miyiga, wuxuuna xilkiisu yahay;

a) kormeerka maamulka iyo Shaqaalaha Dawladaha Hoose ee degmooyinka gobolka ka kooban yahay, wuxuuna ka siinayaa Guddoomiyaha Golaha Horumarinta ee Gobolka iyo Wasiirka warbaxin qoraal ah natiijada kormeerkiisa

b) wuxuu darsaa, talana ka bixiyaa iskudubaridida miisaaniyadd iyo dhaqaalaha Dawladda Hoose;

t ) wuxuu fuliyaa hawlmaalmeedka uu siiyo Guddoomiyaha Golaha Horumarinta Gobolku;

j ) wuxuu kaloo qabanayaa hawlaha la xiriira Laamaha Dawladda ee uu u xilsaaro Golha Horumarinta Gobolka iyo Guddoomiyaha Goluhu, haddii uusan jirin Kaaliye kale ee arrimahaas loo magacaabay.

QODOBKA 50AAD

*(Xafiiska Qorsheynta)*

1) Gobol kasta wuxuuyeelanayaa xafiis qorsheyn oo xilkiisu yahay:

a) diyaarinta qorshaha horumarinta Gobolka;

b) diyaarinta habka ururinta tirakoobka dadka, xoolaha, iwm;

t) qiimeynta iyo daba galka mashaariicda ka socota Gobolka iyo ka warbixintooda;

x) isku xiridda qorshaha guud ee Qaranka iyo kan Gobolka;

kh) wixii hawla ah oo la xiriira qorshaha oo ay u xilsaaraan Guddoomiyaha Golaha Horumarinta Gobolka ama Goluhu.

2) Xafiiska Qorsheyntu wux uuhoos yimaadaa Guddoomiyaha Golaha Horumarinta Gobolka, waxaana madax ka noqonaya Sarkaal ka tirsan Guddiga Qorsheynta Qaranka.

### QODOBKA 51AAD

*(Guddiga Xisbiga ee Degmada)*

1) Degmo kasta waxey leedahay Guddi Xisbi ee Degmo

2) Guddiga Xisbiga ee Degmadu wuxuu masuul ka yahay

a) nabadgelyada Degmada;

b) Kormeerka hawlaha Qaranka ee Degmada ka socda

t) hubinta hirgelinta hawlaha horumarinta Degmada

### QODOBKA 52AAD

*(Xilka iyo awoodda Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Degmada)*

1) Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Degmada waa Sarkaalka ugu sarreeya siyaasadda iyo maamulka Degmada wuxuuna matilaa danta guud ee Qaranka, Xisbiga iyo Dawladd adhexe, wuxuuna hoos yimaaddaa Xoghayaha Guddiga Xisbiga ee Gobolka.

2) Xoghayaha Guddig aXisbiga ee Degmadu wuxuu ku leeyahay Talisyada ku shaqo leh nabedgelyada awood buuxda xagga nabadgelyada iyo xasiloonida guud ee Degmada.

3) Xoghayuhu' wuxuu isku dubaridaa hawlaha Laamaha Dawladda ee ka socda Degmada iyo tuulooyinka raac-san.

**QODOBKA 53AAD**

*(Shirarka iyo hadal qoraalka)*

1) Golayaasha Horumarinta Gobolladu waxey shir isugu imaanayaan, ugu yaraan, saddexdii biloodba mar.

2) Shirkaas waa in uu yeeshaa diiwaan lagu qoro dooda-ha iyo guddoonka la gaaro, waxaana la raacayaa hab-ka Golayaasha Shacbiga ee Degaanka.

**XUBINTA SAGAALAAD**

**QODOBBO KALA DUWAN**

**QODOBKA 54AAD**

*(Xil wareejin)*

1) Wax alla wixii awood ah ee shuruuc iyo xeerar hore ay u aqoonsadeen Maamulka Degmooyinka, waxaa lagu wareejiyey Dawladaha Hoose.
2) Waxaa kale oo lagu wareejiyey Dawladaha Hoose xu-quuqdii iyo waajibaadkii ay lahaayeen ama lagu lahaa Maamulka Degmooyinka intuusan dhaqan gelin shar-cigan.

**QODOBKA 55AAR**

*(Xeer Nidaamiye)*

Madaxweynaha J.D.S., isagoo dhageystay Golaha Wasiira-da iyo soo jeedinta Wasiirka Dawladaha Hoose iyo Horumarinta Miyiga, wuxuu soo saari karaa Xeer Ni-daamiye faahfaahiye, dhameystirana sharcigan.

## QODOBKA 56AAD

**Baabi'in**

1) Sharci kasta ama Xee rkasta oo ka soo horjeeda ama aan la socon krin sharcigan waa la baabi'yey.

2) Waxaa lagu dhaqmi karaa, qodobbada aan la socon karin mooyaane:

a( Sharciga lambar 21 ee 3da Febaraayo 1977 ee Maamulka gobollada iyo Degmooyinka

b) Sharciga lambar 22 ee 10ka Maajo 1979, kuna saabsan wax ka baddel sharciga Maamulka Gobollada iyo Degmooyinka.

## QODOBKA 57AAD

*(Dhaqan-gal)*

1) Sharcigan wuxuu dhaqan galayaa 1da Febaraayo 1980

2) Sharcigan wuxuu ka mid noqonayaa Shuruucda Jamhuuriyadda Dimoqaraadiga Soomaaliya, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah.

Muqdisho 12 Febaraayo 1980

(Jaalle Maxamed Siyaad Barre)

Madaxweynaha J.D.S.

a -laybaid»oRl xbzqee7(S

1) GOBOLKA JUBBADA HOOSE

Golaha Shacbiga ee Degaanka Kismaayo 21 Xubnood
Golaha Shacbiga ee Degaanka Jamaame 21 Xubnood
Golaha Shacbiga ee Degaanka Afmadow 21 Xubnood
Golaha Shacbiga ee Deg. Badhaadhe 13 Xubnood

2) GOBOLKA BAY

Golaha Shacbige ee Degaanka Baydhabo 21 Xubnood
Golaha Shacbiga ee Deg. Buur-hakaba 13 Xubnood
Golaha Shacbiga ee Degaanka Diinsoor 13 Xubnood
Golaha Shacbiga ee Deg. Qansax-Dheere 13 Xubnood

3) GOBOLKA BAKOOL

Golaha Shacbiga ee Degaanka Xudur 21 Xubnood
Golaha Shacbiga ee Degaanka Waajid 13 Xubnood
Golaha Shacbiga ee Degaanka Yeed 13 Xubnood
Golaha Shacbiga ee Degaanka Ceel-Barde 13 Xubnood
Golaha Shacbiga ee Degaanka Tiyeeglow 13 Xubnood

4) GOBOLKA GEDO

Golaha Shacbiga ee Deg. Garbahaarey 21 Xubnood
Golaha Shacbige ee Degaanka Luuq 13 Xubnood
Golaha Shacbiga ee Degaanka Baardheere 21 Xubnood
Golaha Shacbiga ee Degaanka Doolow 13 Xubnood
Golaha Shacbige ee Deg. Beled-Xaawo 13 Xubnood
Golaha Shacbiga ee Degaanka Ceel Waaq 13 Xubnood

5) GOBOLKA SHABEELAHA *DHEXE*

| | |
|---|---|
| Golaha Shacbiga ee Degaanka Jowhar | 21 Xubnood |
| Golaha Shacbiga ee Degaanka Balcad | 21 Xubnood |
| Golaha Shacbige ee Deg. Aadan Yabaal | 13 Xubnood |
| Golaha Shacbige ee Degaanka Cadale | 13 Xubnood |

6) GOBOLKA HIIRAAN

| | |
|---|---|
| Golaha Shacbiga ee Deg. Beled Weyne | 21 Xubnood |
| Golaha Shacbiga ee Deg. Buula Barde | 13 Xubnood |
| Golaha Shacbige ee Degaanka Jalalaqsi | 13 Xubnood |

7) GOBOLKA GALGADUUD

| | |
|---|---|
| Golha Shacbige ee Deg. Dhuusa-mareeb | 21 Xubnood |
| Golaha Shacbiba ee Degaanka Ceel Dheer | 13 Xubnood |
| Golaha Shacbige ee Dagaanka Ceel Buur | 13 Xubnood |
| Golaha Shacbige ee Deg. Cabuud Waaq | 13Xubnood |
| Golaha Shacbige ee Degaanka Cadaado | 13 Xubnood |

8) GOBOLKA MUDUG

| | |
|---|---|
| Golaha Shacbige ee Degaanka Gaalkacyo | 21 Xubnood |
| Golaha Shacbige ee Deg. Xara-dheere | 13 Xubnood |
| Golaha Shacbige ee Degaanka Hobyo | 13 Xubnood |
| Golaha Shacbige ee Degaanka Jarriiban | 13 Xubnood |
| Golaha Shacbige ee Degaanka Galdugob | 13 Xubnood |

9) GOBOLKA NUGAAL

| | |
|---|---|
| Golaha Shacbige ee Degaanka Garoowe | 21 Xubnood |
| Golaha Shacbige ee Degkaanka Eyl | 13 Xubnood |
| Golaha Shacbige ee Deg. Laas-Caanood | 13 Xubnood |
| Golaha Shacbiga ee Degaanka Taleex | 13 Xubnood |

10) GOBOLKA BARI

Golaha Shacbige ee Degaanka Boosaaso 21 Xubnood
Golaha Shacbige ee Degaanka Qardho 13 Xubnood
Golaha Shacbige ee Deg. Bandar Beyla 13 Xubnood
Golaha Shacbige ee Degaanka Iskushuban 13 Xubnood
Golaha Shacbige ee Degaanka ee Caluula 13 Xubnood
Golaha Shacbige ee Degaanka Qandala 13 Xubnood

11) GOBOLKA SANAAG

Golaha Shacbige ee Degaanka Ceerigaabo 13 Xubnood
Golaha Shacbige ee Degaanka Badhan 13 Xubnood
Golaha Shacbige ee Deg. Ceel Afweyne 13 Xubnood

12) GOBOLKA TOGDHEER

Golaha Shacbige ee Degaanka Burco 21 Xubnood
Golaha Shacbige ee Degaanka Buuhoodle 13 Xubnood
Golaha Shacbiga ee Degaanka Oodweyne 13 Xubnood
Golaha Shacbiga ee Degaanka Sheekh 13 Xubnood

13) GOBOLKA WAQOOYI GALBEED

Golaha Shacbige ee Degaanka Hargeysa 21 Xubnood
Golaha Shacbige ee Degaakna Berbera 21 Xubnood
Golaha Shacbiga ee Degaanka Gabiley 21 Xubnood
Golaha Shacbige ee Degaanka Boorama 21 Xubnood
Golaha Shacbige ee Degaanka Seylac 13 Xubnood
Golaha Shacbige ee Degaanka Lug Haye 13 Xubnood

14) GOBOLKA JUBADA DHEXE

Golaha Shacbige ee Degaanka Bu'aale 21 Xubnood
Golaha Shacbige ee Degaanka Jilib 21 Xubnood
Golaha Shacbiga ee Degaanka Saakow 13 Xubnood

15) GOBOLKA SHABEELAHA HOOSE

Golaha Shacbiga ee Deegaanka Marka 21 Xubnood
Golaha Shacbiga ee Deegaanka Qoryooley 21 Xubnood
Golaha Shacbiga ee Deegaanka Afgooye 21 Xubnood
Golaha Shacbiga ee Deegaanka Wanlaweyn 13 Xubnood
Golaha Shacbiga ee Deegaanka Baraawe 13 Xubnood

16) *GOBAOLKA BANAADIR*

Golaha Shacbige ee Magaalada Xamar 35 Xubnood

1) Canshuuraha Dawladaha Hoose loo oggol yahay waa kuwa soo socda:

— Canshuurta: Guryaha, carshaanta baraakooyinka iyo dhismaha kale;

— Canshuurta: Dhibka Xoolaha, xuquuqda tallaalka iyo warqadaha caafimaadka;

— Canshuurta: kala gadashada Xoolaha;

— Canshuurta Shatiyada ganacsiga iyo calaamadda gnacsiga;

— Canshuurta: kale ee dadban iyo isticmaalka nalka;

— Canshuurta: qiimaha dhulka;

— Canshuurta: ruqsadda dhul bixinta, fasaxa dhismaha iyo dib u hagaajinta guryaha

— Canshuurta: Suuqa badeecadda;

— Canshuurta: gawraca Xoolaha;

— beeraha iyo dhirta, aan joogtada aheyn;

— Canshuurta: Dhoofinta Xoolaha, beeyada, xabagta, Kalluunka, cawda, oodda iyo cusbada;

— Canshuurta Shatiyada Wakaaladaha iyo Warshadaha iwm;

— Sharaabka iyo qaatka;

— Canshuurta: hargaha iya badarka;

— fadhiga Baabuurta;

— Canshuurta: dad dhigidda, dhalashada, aqoonsiga, sugitaanka, asluubta, qoyska iyo degsiimada;

— Canshuurta: Makiinadaha qoxwada, miisaanka iyo maaweelada.

2) Xuquuqda kale ee loo oggol yahay haddii hawlahooda ay qabtaan waxaa ka mid ah:

— qeybinta korontada;

— gaadiidka dadweynaha;

— qaadidda qashinka iyo nadaafadda musqulaha;

— biyaha baraakadaha laga dhaansado;

— qaadidda iyo qaboojinta hilibka iyo kalluunka;

— hawlaha farsamada iyo caafimaadka;

— soo saaridda barafka;

— Kirada guryaha ay dadweynaha u dhisaan.

## QAYBTA LABAAD

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 25 ee 15 Feb. 80 Magacaabid Golaha Dawladda Cusub

ISAGOO ARKAY: Dastuurka J.D.S. qod. 82 xubinta 7aad iyo 14aad

ISAGOO TIXGELINAYA: Inay tahay laga maarmaan in la magacaabo Wasiiro iyo Wasiirro ku xigeenno

WUXUU SOO SAARAYAA XEERKA SOO SOCDA

### *QODOBKA 1AAD*

1. Jaalle S/Gaas Xuseen Kulmiye Afrax Kaaliyaha M.J.D.S. Arrimaha Dawladda

2. Jaalle S/Guud Maxamed Cali Samatar — Wasiirka Wasaaradda Gaashaandhigga

   Jaalle S/Guuto Cumar Xaaji Maxamed — Wasiir ku xigeen

   Jaalle S/Guuto Yuusuf Axmed Salxaan — Wasiir ku xigeen

3. Jaalle S/Guuto Axmed Saleemaan Cabdalla — Taliyaha NSS iyo La- Taliyaha M.J.D. xagga Arrimaha Nabadgelyada

4. G/Sare Axmed Xasan Muuse — Wasiirka Wasaaradda Beeraha

   Jaalle Dr. Maxamuud Cabdi Nuur — Wasiir ku xigeen

5. Jaalle Dr. Axmed Xabiib Axmed — Wasiirka Wasaaradda Qorsheynta Qaranka

   Jaalle Dr. Maxamed Cumar Jaamac — Wasiir ku xigeen

6. Jaalle Dr. Cabduraxmaan Jaamac Barre — Wasiirka Wasaaradda Arrimaha Dibadda

   Dr. Maxamuud Saciid Maxamed — Wasiir ku xigeen

7. Jaalle Inj Cumaan Jaamac Cali — Wasiirka Wasaaradda Kalluumeysiga

   Jaalle Shire Suudi Maxamuud — Wasiir ku xigeen

8. Jaalle S/Guuto Maxamuud Geelle Yuusu — Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka Badda iyo Dekadaha

Jaalle Jaamac Gaas Macaawiye — Wasiir ku xigeen

9. Jaalle Dr. Axmed Shire Maxamuud — Wasiika Wasaaradda Garsoorka iyo Arrimaha Diinta

Jaalle Dr. Maxamed Cali Xaamud — Wasiir ku xigeen

10. Jaalle Aadan Maxamed Cali — Wasiirka Wasaaradda Waxb. iyo Barbaarinta

Jaalle Dr. Saleymaan Maxamuud Aadan — Wasiir ku xigeen

Jaalle Dr. Cabduraxmaan Cabdulle Shuke — Wasiir ku xigeen

11. Jaalle Dr. Axmed Ashkir Bootaan — Wasiir ku xigeen

Jaalle Faaduma Axmed Caalin — Wasiir ku xigeen

12. JaalleG/Sare Mire Awaare Jaamac — Wasiirka Wasaaradda Dhallinyarada iyo Isboortiga

Dr. Daahir Warsame Yuusuf — Wasiir ku xigeen

13. Jaalle Dr. Cabdulqaadir Qaasim — Wasiirka Wasaaradda Macdanta iyo Biyaha

Jaaaale Dr. Maxamed Xaaji Axmed — Wasiir ku xigeen

14. Jaalle Dr. Maxamed Xawaadle Madar — Wasiirka Wasaaradda Boostada iyo Isgaarsiinta

Jaalle Dr. Maxamuud Sheekh Mursal — Wasiir ku xigeen

15. Jaalle Maxamed Buraale Ismaaciil — Wasiirka Wasaaradda Shaqada iyo Arrimaha Bulshada

Jaalle Dr. Maxamed Yuusuf Axmed — Wasiir ku xigeen

16. Jaalle Dr. Maxamed Cali Nuur — Wasiirka Wasaaradda Xannaanada Xoolaha Dh. iyo Daaqa

Jaalle Dr. Cali Saalax Cabdikariin — Wasiir ku xigeen

17. Jaalle Dr. Axmed Maxamed Siilaanyo — Wasiirka Wasaaradda Ganacsiga
Jaalle Dr. Cabdirashiid Sheekh Axmed — Wasiir ku xigeen

18. Jaalle Dr. Cabdullaahi Axmed Caddow — Wasiirka Wasaaradda Maaliydda
Jaalle Dr Cali Xuseen Cabdulle — Wasiir ku xigeen

19. Jaalle S/Gaas Cabdalla Maxamed Faadil — Wasiirka Was. Caafimaadka
Jaalle Maxamuud Faarax Ciise «Gaashaan» Wasiir ku xigeen

20. Jaalle S/Gaas Jaamac Maxamed Qaalib — Wasiirka Wasaaradda D/Hoose R/Miyiga
Jaalle Cabdi Maxamed Tarrax — Wasiir ku xigeen

21. Jaalle Dr. Kanadiid Axmed Yuusuf — Wasiirka Wasaaradda Gaadiidka Dhulka iyo Cirka
Jaalle Dr Cumar Maxamed Cabdulle — Wasiir ku xigeen

23. Jaalle Dr. Cali Khaliif Galeyr — Wasiirka Wasaaradda Warshadaha
Jaalle Dr., Maxamed Nuur Caliyow — Wasiir ku xigeen

24. Jaalle Dr. Maxamed Aadan Sheekh — Wasiirka Was. Warfaafinta iyo Hanuunita Ummadda
Jaalle Dr. Khaliif Muuse Samatar — Wasiir ku xigeen

25. Jaalle S/Guuto Maxamed Nuur Galaa — Wasiirka Wasaaradda H. Guud
Jaalle Maxamed Cabdi Yuusuf — Wasiir ku xigeen

26. Jaalle G/Sare Cabdi Warsame Isaaq — Wasiirka Madaxtooyada xagga Arrimaha Bulshada
Jaalle Cabdullaahi Jaamac Maxamed — Wasiir ku xigeen

27. Jaalle Dr. Maxamed Sasiid Samantar «Gacaliye» — Wasiirka Madaxtooyada Xagga Arrimaha Siyaasadda

Jaalle G/Sare Maxamed Cumar Jees — Wasiir Wasaaradda Dalxiiska
Jaalle Cabdiraxmaan Maxamed Caraale — Wasiir ku xigeen

*QODOBKA 2*AAD

Xeerkani wuxuu dhaqan galay 7dii bisha Febaraayo 1980, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda

Muqdisho 7.2.1980

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)
Madaxweynaha J.D.S.

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 26 ee 7 Febraayo 1980

Magacaabid Xil Sare

MADAXWEYNAHA
J. D. S.

ISAGOO ARKAY: Qod. 82aad Xubintiisa 14aad ee Dastuurka J.D.S.

ISAGOO TIXGELINAYA: Isbeddelka waayaha cub ee ay la yimaadeen sameynta Golayaasha Shacbiga heerka Qaran iyo Degaan.

WUXUU SOO SAARAY

Xeerkan QODOBKA1AAD

Waxaa loo magacaabay Jaalle Dr Axmed Cali Saalax la-Taliyaha Madaxweynaha Xagga Arrimaha Sharciga iyo Dastuurka.

**QOOBKA 2AAD**

Xeerkani wuxuu dhaqan galay 7.2.80 waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

Madaxweynaha J.D.S.

XEER MADAXWEYNAHA J.D.S. L. 27 ee 7 Febaraayo 80 Magacaabid Xil Sare

MADAXWEYNAHA
J. D. S.

ISAGOO ARKAY: Qod. 82aad Xubintiisa 14aad ee Dastuurka J.D.S.,

ISAGOO TIXGELINAYA: Danaha dadweynaha Soomaaliyeed

gaar ahaan ganacsiga iyo ilaalinta sharciyada iyo Dastuurka dalka ee J.D.S.

**WUXUU SOO SAARAYAA**

*Xeerkan Qod 1aad*

Waxaa la magacaabay Jaalle G/Sare Cabdullaahi Warsa-Nuur Guddoomiyaha Guddiga Iibka Qaranka Soomaaliyeed.

**QODOBOKA 2AAD**

Xeerkani wuxuu dhaqan galay 7.2.80, waxaana lagu soo saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

saarayaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)

Madaxweynaha J.D.S.

XEER MADAXWEYNAHA JDS L. 28 ee 8 Febraayo 1980, Dib ugu soo celin Ciidanka Booliska.

MADAXWEYNAHA

**J. D. S.**

ISAGOO ARKAY: Dastuurka J.D.S. Qodobka 82aad

ISAGOO ARKAY: Sharciga lambar 2 ee 23.12.1972kii oo ku saabsan dhismaha Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed;

ISAGOO DHAGEYSTAY: Talada uu soo jeediyey Taliyaha Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed.

*WUXUU XEERIYEY*

***QODOBKA 1AAD***

Jaalle Xuseen Rooble Siyaad oo hore uga tirsanaan jiray Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed dib ayaa loogu soo celiyey Ciidanka Boliiska Soomaaliyeed laga bilaabo 1.2.80, isagoo qaadanaya derejadii uu sitay markii ciidanka Boliiska laga wareejiyey ee aheyd Gaashaanle.

QODOBKA 2AAD

Xeerkani degdeg buu u dhaqan gelayaa, waxaana lagu soo saari doonaa Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda.

Muqdisho 8 2 1980

(S/Gaas Maxamed Siyaad Barre)
MADAXWEYNAHA JDS

WAAN ARAGNAY EE DIIWAANGELINNAY,
Diiwaanka lamb. 2 Bog. lamb. 9,
Muqdisho 26 Feb. 1980,
Hantidhawrka Guud KMG

*OGEYSIIS SHIR SAAMILEY.*

***WARSHADDA KIIMIKADA SOOMAALIYEED «BAYL»***

Waxaa dhammaan laysugu yeerayaa saamileyda Shirkadda Warshadda Kiimikada Soomaaliyeed «BAYL» inay ka soo qeyb galaan shirka Saamileyda caadiga ah oo lagu qaban doono Xarunta Shirkadda ee Xamar, saacaddu markey tahay 17 ama shanta galabnimo, bisha Maajo 12keeda, 1980 hadduu shirku dhammaan waayana mar labaadka bisha Maajo 19keeda isku saacadda kor ku qoran

Saamileyda Shirkadda waxaa laga codsanayaa inay shan maalmood ka hor keenaan saamileyda ku qoran, saldhigga shariikadda ilaa iyo intii uu shirku ka dhammaado.

***ARRIMAHA DOODDA***

1) Oggolaadka Dheellitirka Xisaabaadkii 1979ka;

2) Magacaabid Xubin cusub oo ku meel gaar ah Guddiga Baarista.

3) Wixii kale ee soo raaca ama door la bido in laga doodo

Guddiga Maamulka

L. 67

*OGEYSIIS SHIR SAAMILEY*

WARSHADDA SAABUUNTA QUBEYSKA IYO MARISKA

Waxaa dhammaan laysugu yeerayaa saamileyda Shariikadda Warshadda Saabuunta Qubeyska iyo Mariska inay ka soo qeyb galaan shirka saamileyda caadiga ah oo lagu qaban doono xarunta Shariikadda ee Xamar, saacaddu markay tahay 17 ama shanta galabnimo, bisha Maajo 14keeda 1980, hadduu shirku dhammaan waayana mar labaadka bisha Maajo 21keeda saacadda kor ku qoran

Saamileyda Shirkadda waxaa laga codsanayaa inay shan maalmood ka hor keenaan saamiyaasha ku qoran, saldhigga Shariikadda ilaa iyo intii uu shirku ku dhamaado.

*ARRIMAHA* **DOODDA**

1) Oggolaadka Dheellitirka Xisaabaadkii Sannadkii 79kii

2) Wixii kale ee soo raaca ama door la bido in laga doodo.

Guddiga Maamulka

MAXKAMADDA GOBOLKA BANAADIR
GUDDOOMIYAHA

HADDUU ARKAY: Akhriyey dacwadda kor ku qoran;

HADDUU ARKAY: Hubsaday in Buug Keyd dhumay oo lambarkiisu ahaa 13443. Lagana soo saaray Bankiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta kuna qorneyd lacag dhan Sh. So. 32,002 uu iska lahaa Maxamed Xasan Aadan sida ku cad warqadda lam. ——— taariikh 01314. oo bangiga Ganacsiga iyo Keydka Soomaaliyeed Laanta Xarunta.

HADDUU ARKAY: Qod. 69 sharciga lam. 2 ee 9.9..65.

WUXUU XEERIYEY

In la baabi'iyo (ammortamento) buug keydka lam. 13.443, oo ku qoran magaca Maxamed Xasan Aadan ayna ku jirto Sh. So. 32.002

WUXUU FASAXAY

In Bankiga Ganacsiga iyo keydka laanta Xarunta u beddelo Maxamed Xasan Aadan (buugga keydka, ee kor ku tilmaaman una sameeyo mid la mid ah ka dib markay ka soo wareegto muddo aan ka yarayn 30 maalmood maalinta go'aanka lagu daabaco Faafinta Rasmiga ah ee Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Soomaaliyeed, haddii inta ka horreysa aan is hortaag laga keenin.

Muqdisho, 16.2.80

Guddoomiyaha Maxkamadda
Gobolka Banaadir
Dr. Cabdullaahi Maxamed Maax-